LAANTA GAADIIDKA EE PORTLAND - FOOMKA CABASHADA TAKOORKA

Waa xeer u yaala Magaalada Portland in laga hortago takoorka ku saleysan isirka, midabka, wadanka qofku kasoo jeedo, jinsiga, naafada, da'da, diinta, xaalada guurka ee qofka, xaalada qoyska, dookha galmada, aqoonsiga jinsiga, isha dhaqaalaha, iyo aqoonsiyada lamidka ah ee sharcigu difaacaayo. Talaabadaan ayaa waafaqsan xeerka federaalka ee ee Xuquuqda Madaniga ah Title VI iyo Sharciga Ameerikaanka Naafada ah (ADA) Title II, iyo sidoo kale Sharciga Cusub ee Oregon 659A.403 (Takoorka ka jira goobta shaqada dadwaynuhu waa mamnuuc), iyo Xeerka Magaallada Portland Title 23 (Xuquuqda Madaniga ah).

Takoorka noocaas ah ayaa khatar ku ah caafimaadka, badqabka, iyo faya-qabka guud ee xubnaha bulshada Portland waxayna kasoo horjeedaa mabaadii'deena ka magaallo iyo laan ahaanba. Sida sharcigu qabo, xeerarkaan ayaa qabanaaya Laanta Gaadiidka ee Portland (PBOT), shaqaalaheeda, iyo sidoo kale qandaraasleyaasha PBOT, iyo dhinacyada kale ee hela maal gelinta federaalka.

Shaqsi kasta, koox, ama urur aaminsan in la takooray ama loo diiday gunnooyinka wax kamid ah barnaamijyada PBOT, adeegga, ama shaqada, ayaa warbixin u gudbin kara PBOT. Haddii aadan awoodin inaad iimeel ku soo dirto foomkaan elektaroniga ah ama aadan dooneyn inaad elektaroonig ahaan ku dirto, fadlan ka wac xiriirka magaallada/degmada 3-1-1 (maxaliyan) ama lambarka 503-823-4000 (ka baxsan aaga) si laguu caawiyo. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan hawsha, la xiriir Maamulaha Sinaanta iyo Wadajirka ee PBOT oo aad ka wacayso 503-823-8094.

Waxaan kaaga baahan doonaa xog aasaasi ah oo aad raacinayso nooca cabashadaada. Tani waxay noo sahlaysaa inaan kula soo xiriirno, aana qorno aana ka shaqeyno cabashadaada, waxayna naga caawinaysaa noocyada xeerarka federaalka, gobalka iyo/ama magaallada ee takoorka ee cabashadaadu waafaqsan tahay. Lagaama doonaayo inaad adeegsato foomka hoose; waraaq ay ku qoran tahay isla xogta ayaa kugu filan.

Xogta aad halkaan ku sheegto ayaa loo arkaa diiwaan dadwayne waana la faafin karaa sida ku cad Sharciga Diiwaannada Dadwaynaha ee Oregon. Sharcigaan ayaa kala qeexaaya xogta qaar oo dadwaynaha loo bandhigaayo, kuna jirta codsiga. Eeeg xeerka sirta ee Portland si aad u hesho xog dheeri ah. Waa xeer u yaala OBOT in xogta aad ku bixiso foomkaan (ama foomamka kale) lagu hayo si sir ah ilaa heerka ugu sareeya ee macquulka ah, kaasoo waafaqsan Sharciga Diiwaannada Dadwaynaha ee Oregon. Fadlan ku sheeg Su'aasha 1 in aad dooneyso iyo in kale inaad cabashadaan ku hayso mid sir ah (sida caadiga ah) ama aad ka tanaasulayso sirta xogtaada.

Magaallada Portland waxay xaqiijinaysaa in qaab macno leh loo helo barnaamijyada magaalada, adeegyada, iyo shaqooyinka si loo raaco Sharciyada Xaquuqda Madaniga ah ee Title VI iyo ADA Title II waxayna si macquul ah u bixisaa: turjumaada, fasiraada, wax ka badallada, fursado, qaabab gaar ah, agabka kaalmaatiga ah iyo adeegyo. Si aad u codsato adeegyadaan, la xariir 503-823-5185, City TTY 503-823- 6868, Relay Service: 711.

FADLAN BUUXI FOOMKA HOOSE SI AAD U GUDBISO CABASHADAADA QAAB ELEKTAROONIG AH

1. ***Ka tanaasulida Sirta** ** God Qasab ay tahay in la buuxsho*
   Xogtaada ayaa lagu hayn doonaa mid qarsoodi ah ilaa inaad tig saarto maahee godka xaqiijinaaya inaad dooneyso inaad meesha ka saarto sirta.
   - ☐ **Kama tanaasulaayo sirta, ku hay cabashadaan mid sir ah (sida caadiga ah)**
   - ☐ **Waan ka tanaasulayaa sirta**
2. ***Xogta xiriirka qofka buuxinaaya cabashada.** Qofkaan ayaa noqon kara dhinac sadexaad. Fadlan sheeg magaca, lambarka taleefanka, iyo iimeelka si aan u qorno cabashadaan aana kuula wadaagno.

Magaca:

Ciwaanka:

Taleefanka Shaqsiga ah:

Taleefanka shaqada:

Iimaylka:

3. **Qofka iyo/ama Dhinacyada lagu takooray** (haddii uusan ahayn ama dheeri ku yahay cabtaha). Qor magacyada dhammaan shaqsiyaadka, kooxaha, bulshooyinka, iyo/ama ururada aad ku eedeynayso inay ku takooreen.

4. ***Cabashadaan ma naftaada ayaad u gudbinaysaa?** Haa ☐ Maya ☐

   Haddii aad uga jawaabtay 'Maya' qaybta kore, ma heshay oggolaanshaha qofka si aad cabashadu ugu gudbiso? Haa ☐ Maya ☐

   Haddii aad uga jawaabtay "Maya" su'aasha kore, waa maxay xiriirka kaala dhexeeya qofka aad codsigaan ama cabashada aad u gudbinayso?

   Fadlan sharax sababta aad ugu gudbinayso cabashada qof sadexaad:

5. ***Nooca takoorka** (tigsaar dhammaan meelaha quseeya)

Isirka/midabka ☐	Ka baxsan diinta ☐	Dookha Galmada ☐
Wadanka Qofku kasoo Jeedo ☐	Jinsiga ☐	Aqoonsiga ama dareenka jinsiga ☐
Aqoonta Ingiriisiga ☐	Xaalada Guurka ☐	Isha dakhliga ☐
Naafada ☐	Xaalada qoyska ☐	Mid kale (fadlan sheeg) ☐
Diinta ☐	Da'da ☐	

6. ***Yaa gaystay takoorka?** Inta aad ogtahay, fadlan noo sheeg cida gaysatay takoorka. Tan ayaa noqon karta magaca laanta magaallada ama xafiis, waax, barnaamij, mashruuc, shaqo, qandaraasle, ama shaqaale gaar ah, ama cid kale oo hesha maal gelinta federaalka kaasoo gaystay takoorka laga dacwoonaayo:

7. ***Goorma ayuu takoorku dhacay?** Bixi xogta ugu badan ee aad awoodo ee ku saabsan taariikhaha iyo wakhtiyada.

8. ***Xagee ayuu takoorku ka dhacay?** Fadlan bixi ciwaanka saxda ah, haddii uu jiro, ama noo sheeg haddii takoorka laga soo dacwooday aan loo gaysan si toos ah laakiin loo gaystay qaab kale ama lagu gaystay xiriir sida iimeelka, fariin qoraal, ama wicitaanka taleefanka.

9. ***Maxaa dhacay?** Fadlan qeex takoorka aad ka dacwoonayso sida ugu cad ee macquulka ah, adoo adeegsanaaya erayadaada. Qor qoraalka ugu dheer ee aad u baahan tahay.

10. **Marqaatiyaasha.** Haddii ay jiraan marqaatiyaal kale, fadlan sheeg magacyadooda iyo xogta xiriirka.

11. Natiijada la doonaayo. Qeex talaabo kasta ama xalka aad dooneyso inaad aragto in la qaadaayo.

12. *Cabasho ma u gudbisay wakaalado kasta oo kale oo federaalka, gobalka, ama maxaliga ah, ama maxkamad federaal ama gobal. Haa ☐ Maya ☐

Haddii ay haa tahay, hoos ku qor wakaaladahaas, adoo raacinaaya xogta xiriirka, haddii aad hayso:

13. *Saxiix oo taariikhda ku qor cabashada.

Taariikhda:

Qor ama Daabac Magaca Cabtaha:

Marka aad saxiixdo aadna gudbiso foomkaan, waxaad xaqiijinaysaa in xogta aad bixisay, iyo dhammaan agabka la socda, ay run yihiin inta aad ogtahay.

FADLAN IIMEEL UGU DIR FOOMKA AAD BUUXISAY IYO AGAB KASTA OO DHEERI AH OO QUSEEYA CABASHADAADA:

Laanta Gaadiidka ee Portland
Attn: PBOT Equity & Inclusion Manager
1120 SW Fifth Avenue, Suite 1331
Portland, OR 97204
503-823-8094 | pbotequityteam@portlandoregon.gov

Magaallada Portland waxay xaqiijinaysaa in qaab macno leh loo helo barnaamijyada magaalada, adeegyada, iyo shaqooyinka si loo raaco Sharciyada Xaquuqda Madaniga ah ee Title VI iyo ADA Title II waxayna si macquul ah u bixisaa: turjumaada, fasiraada, wax ka badallada, fursado, qaabab gaar ah, agabka kaalmaatiga ah iyo adeegyo. Si aad u codsato adeegyadaan, la xariir 503-823-5185, City TTY 503-823-6868, Adeegga Dhagoolka: 711.

PBOT
PORTLAND BUREAU OF TRANSPORTATION